

Codso Lacagta Daryeelka Deegaanka Seattle

Gaarista yoolalka cimilada ee Seattle waxay u baahan tahay qof walba ka-qaybgalkiisa. Tani waa sababta Xafiiska Ilaalinta iyo Deegaanka Seattle uu ugu faraxsan yahay inuu ku dhawaaqo in codsiga Lacagta Caddaaladda Deegaanka ee 2026 **hadda uu furan yahay!** Maalgelinnada sida Sanduuqa Caddaaladda Deegaanka (Environmental Justice Fund) waa qayb ka mid ah istaraatiijiyadda Seattle ee lagu taageerayo xalal bulshada ka yimaada -oo ay bulshadu hoggaaminayso, kuwaas oo dardargeliya tallaabooyinka la xiriira cimilada.

Sanduuqa Cadaaladda Deegaanka wuxuu raadinayaa mashruucyo la jaanqaadaya mid ka mid ah afarta mudnaan ee maalgelinta: 1) horumarinta hoggaaminta bulshooyinka ay isbeddelka cimiladu ugu hor saameeyaan uguna daran tahay, 2) taageeridda xalalka cimilada ama deegaanka ee ay bulshadu hoggaaminayso, 3) tababaro iyo fursado lagu baranayo xirfadaha la xiriira cimilada, iyo 4) dhisidda adkeysiga si loo ilaaliyo caafimaadka iyo wanaagga bulshada.

Sanduuqa Cadaaladda Deegaanka wuxuu maalgelin ku sameeyaa mashruucyo ay hoggaaminayaan ama iskaashi kula jiraan Bulshooyinka Madowga ah, Dadka Asaliga ah, Dadka Midabka Leh (BIPOC), soogalootiga, qaxootiga, dhallinyarada, waayeelka, iyo dadka dakhligoodu hooseeyo. Mudnaanta waxaa la siin doonaa mashruucyada u adeega xaafadaha mudnaanta leh ee soo socda: Beacon Hill, Bitter Lake, Central Area, Chinatown-International District, Delridge, Georgetown, Haller Lake, Lake City, Mount Baker, Othello, Rainier Beach, iyo South Park.

Qabaa'ilka iyo ururada qabaa'ilka, ururada aan faa'iido doonka ahayn, iyo bulshada iyo kooxaha xaafadaha ayaa xaq u leh maalgelinta. Hawlaha u-qalma waxaa ka mid ah:

- Xalalka u adkeysiga iyo la-qabsiga cimilada
- Qorsheynta iyo sawiridda aragtida bulshada
- Ilaalinta iyo/ama waxbaridda aqoonta dhaqanka
- Farshaxan iyo sheekooyin diiradda saaraya deegaanka ama cimilada
- Waxbarasho, wacyigelin, iyo/ama ka-qaybgal diiradda saaraya deegaanka ama cimilada
- Barnaamijyada lagu baranayo xirfadaha la xiriira cimilada
- Dhisidda awooda bulshada iyo abaabulka

Sannadkaan, mashruucyadu waxay socon karaan muddo 22 bilood ah waana inay bilaabmaan Febraayo 2027 kuna dhammaadaan Nofeembar 2028. Waxaa jira **laba ikhtiyaar oo maalgelin ah oo la heli karo:**

- Ikhtiyaarka 1'aad: wuxuu bixiyaa deeqo u dhexeeya \$60,000 ilaa \$80,000
- Ikhtiyaarka 2'aad: wuxuu bixiyaa deeqo u dhexeeya \$80,001 ilaa \$120,000

Sideen u codsadaa?

Tallaabada 1: Hubi inaad u qalanto inaad [codsato](#) ka hor Luulyo 14 saacadda 5 galabnimo

- **MUHIIM:** Tani waa **tallaabo** waajib ah si aad u soo gudbiso codsigaaga oo dhammaystiran.
- Markaad dhammaystirto tallaabadan, *haddii aad ku cusub tahay codsashada deeqaha*, waxaa laguugu qori doonaa la-taliye kaa caawin doona dhammaystirka codsigaaga.

Tallaabada 2'aad: Soo gudbi codsigaaga oo dhammaystiran

Nala so xiriir!

Waxaan kugu dhiirrigelinaynaa inaad qaaddo mid ka mid ah tallaabooyinka soo socda haddii aad xiisaynayso inaad wax badan ka ogaato Lacagtaan, aan ka wada hadalno fikrad mashruuc, ama aad soo gudbiso soo jeedin:

1. Ka qaybgal kulanka macluumaadka farsamada:
 - a. Arbaco, Juun 10, 2026, laga bilaabo 6 - 7:15pm.
 - i. [Halkan iska diiwangeli](#)
 - b. Talaado, Juun 30, 2026, laga bilaabo 12 to 1:15 pm.
 - i. [Halkan iska diiwangeli](#)
2. Ka qaybgal saacadaha xafiiska ee khadka oo lala kulmo shaqaalaha EJ Fund:
 - a. Arbaco, Juun 17, 12-1pm
 - i. [Ku biir kulanka](#) Zoom-ka
 - b. Arbaco, Luulyo 8, 12-1pm
 - i. [Ku biir kulanka](#) Zoom-ka
3. Su'aalahaaga noogu soo dir iimaylka equityenviro@seattle.gov

Si aad u codsato turjumaad ama adeegyo kaalmeyn oo loogu talagalay kulamada macluumaadka ama saacadaha xafiiska, fadlan iimayl [u dir equityenviro@seattle.gov](mailto:u_dir_equityenviro@seattle.gov) ugu yaraan 3 maalmood oo shaqo ka hor kulanka aad qorshaynayso inaad ka qayb gasho.